

Casharka 1	Hagaha Kaqaybqaataha Adeega Tababarka Caafimaadka iyo Badqabka 1 Xarumaha Daryeelka Ilmaha
Qoraaga Koorsada: Sharon Bergen 2016; Dib u eegid lagu sameeyay 2023	2 Saacadood

Xuquuqda lahaanshaha iyo Xadidnaanta Isticmaalka iyo Mas'uuliyadaha ka dhalanaya

Manhajkaan waxaa lagu diyaariyay maalgalin ay bixisay Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota. Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota wax wakiil ah kama ahan wax mas'uuliyad ahna kama saarna isticmaalkiisa ama natiijadiisa. Manhajkaan dib looma soo saari karo, lama koobin karo, lama iibin karo ama si kale looma qaybin karo ayada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.

Si aad u codsato oggolaansho qoraal ah oo ku saabsan isticmaalka ama dib usoo saarista qayb kamid ah manhajkaan, iimayl u dir DHS.Child.Care@state.mn.us.

Si aad u hesho tixraacyada tababarka dheeraadka ah, khayraadka, buugaagta iyo waxyaabo kale, [booqo bogga khayraadka koorsada oo lifaaqiisu halkaan ku jiro](#) ama aad ka helayso koodhka QR ee dhanka midig!



Guudmarka Casharka

Qaybta Nuxurka Hanaanka Aqoonta iyo Howlkarnimada (KCF, Knowledge and Competency Framework) Iyo Qaybaha Nuxurka CDA.

Nuxurka Hanaanka Aqoonta iyo Howlkarnimada Iyo Qaybaha Nuxurka CDA halkaan ayay ku qoranyihiin si ay ka qaybqaateyaasha uga caawiyaan fahamka waxa ay yihiin qaybaha howlkarnimada, nuxurka iyo/ama waxyaabaha muujinaya looga hadlo tababarkaan.

[Qaybta Nuxurka KCF:](#) VII: Caafimaadka, Badqabka, iyo Nafaqada

Qaybta Nuxurka CDA: Qorsheynta deegaan waxbarasho oo badbaado iyo caafimaad qaba

Ujeedooyinka Waxbarashada:

Ayada oo tababarka kaliya uusan xaqiijinayn ujeedooyinka waxbarashada, hadana waxaa loo qaabayn karaa in lagu gaaro yoolal gaar ah oo loogu tala galay arday walba. Haddii ardaydu noqdaan kuwo wadashaqayn iyo ka qaybqaadasho leh, waxay baran doonaan:

- Sharax qaababka lagu yareynaayo faafitaanka cudurada faafa, oo ay ku jiraan badqabka cuntada, Taxaddarada Caadiga ah, nadaafada/adeegsashada daawada nadaafada/jeermiska, dhaqida gacmaha, badelida xafaayada/gelida musqusha, hubinada caafimaadka maalinlaha ah, iyo cudurada qofka looga reebaayo.
- Sharax xeerarka shatiga ee la xiriira ka hortagga/wax ka qabashada xasaasiyada, maareynta daawooyinka, saaritaanka iyo ka warbixinta cudurada faafa, maareynta/tuurista dheecaanada jirka ka yimaada, iyo warbixinta waajibka ah.
- Aqoonsashada noocyada xadgudubyada lagula kaco ilmaha iyo calaamadaha iyo astaamaha muujiya

Ujeedada Kulanka:

- A. Horudhaca
- B. Yareynta Faafitaanka Cudurka Faafa
 - a. [Cayrinta Ilmaha Xanuunsan](#) iyo Cudurka faafa
 - b. [Baaritaanka Caafimaadka ee Maalin kasta](#)
 - c. [Taxadarada Guud](#) – [Farxalka](#), [badelidda xafaayada](#), [nadiifinta/ma sixida/jeermis dilida](#)
- C. Ka hortaga Cudurada cuntada ka dhasha iyo Yareynta Qaadida Xasaasiyadaha
 - a. [Cudurada Cuntada Laga Qaado](#)
 - b. Xasaasiyaadka iyo Ciladaha Cuntada
- D. Daawo Bixinta
 - a. Daawooyinka dhakhtar qoro iyo kuwa la iska soo iibsado
 - b. Raacista '5 qodob ee [Saxnaanshaha siinta daawada](#)
 - c. Neefta
- E. Aqoonsiga iyo Ka Hortaga Xadgudubka iyo Dayacaada
 - a. Waa maxay Xadgudub iyo Dayacaad
 - b. Soo sheegista Waajibka ah
 - c. Kahortaga Xadgudubka
- F. Soo koobida iyo Dib u milicsiga

Ilaha Muhiimka ah: Labadaan khayraad ayaa aasaas u ah qaybo badan oo kamid ah casharkaan.

1. [Xeerk 3](#): Xeerarka Minnesota, qaybaha 9503.0005 to 9503.0170 – Ruqsadda Xarumaha Daryeelka Carruurta
2. Caring for Our Children: Heerarka Waxqabadka Caafimaadka iyo Badqabka ee Qaranka; Tilmaamaha Barnaamijyada Daryeelka iyo Waxbarashada Carruurta <https://nrckids.org/CFOC/TOC>

Yareynta Faafitaanka Cudurka Faafa iyo Xanuunnada Kale

- Xanuunka/ka saaridda daryeelka - eeg: [Xeerk 9503.0080 Sharciyada Shati-bixinta: KA SAARISTA GOOBTA CARRUURTA XANUUNSAN](#)
- Talaalada – jadwalka 2023 ayaa laga heli karaa oonleenka Xarumaha Xakameynta iyo Kahortagga Cudurada [Jadwalka Talaalka ee CDC](#)
- Taxadarada Guud:
 - Nadaafada Gacmaha - **GOORTA (INTA JEER) iyo SIDA (ADAG)**

Hel liiska buuxa ee [Jadalka farsamada ugu fiican ee nadiifinta, tirtirista iyo jeermis dilista](#) oo aad oonlayn uga helayso CFOC.

Hawlo-maalmeedka Nadiifinta, Jeermis-dilista, iyo Tirtirista (laga soo xigtay Caring for Our Children)

- **Nadiifinta:** habka farsamada nadiifinta iyadoo la isticmaalayo **saabuun ama shaambo iyo biyo si loo saaro wasakhda**, burburka, iyo jeermisyo badan. Waxay sidoo kale meesha ka saartaa burburka aan muuqan ee farageliya jeermis-dilista. **Loo adeegsado ka hor inta aan la tirtirin ama jeermiska laga dilin.**
- **Tirtirida sagxadaha:** Habka kiimikada ah ee lagu yaraynayo tirada jeermiska keenaya cudurka ee saaran sagxadaha la nadiifiyay oo laga dhigo heer badbaado ah. Ereygani waxaa loo adeegsadaa iyadoo loo tixraacayo **sagxadaha ay taabtaan cuntada ama alaabo-alaabayda/walxaha la geliyo afka.**
- **Jeermis dilista:** Habka kiimiko ah oo isticmaala waxyaabo gaar ah oo lagu burburinayo jeermisyada waxyeellada leh (marka laga reebo duleelada bakteeriyada) ee saaran sagxadaha deegaanka (sida **musqulaha iyo dhulka, sagxadaha lagu beddelo xafaayadaha, iyo sagxadaha kale ee la gaarsiyo dhiigga ama dheecaanada kale ee jirka**)

Dareeraha Nadiifinta iyo Tirtirida sagxadaha - Warankiilo lagu daray Biyo (MDH [Sida Loo Qaso Milanka Warankiilada](#)):

- Biyaha ku qas warankiilada oo xaqiiji in aad ku qorto waxa ku jira (oo wata taariikhda la qasay); dhig jubadaha buufinta meel aysan gaarin ilmaha.
- Sagxadaha marka hore ku dhaq saabuun ama shaambo iyo biyo.
- Ku buufi biyaha jeermis-dilaha una oggoolow inay hawada ku qalalaan.

Cuntada – Ka hortaga Cudurada cuntada ka dhasha iyo Yareynta Qaadida Xasaasiyadaha

Fiiri: [Xogta Daryeelka Carruurta qaba Xasaasiyadaha cuntada](#) (CFOC) iyo Laynka Caafimaadka, waxaa ku jira [Xasaasiyadaha Guud ee Carruurta ee u Baahan in Laga Feejignaado](#)

Daawo Bixinta

Si xun ula dhaqmida Ilmaha iyo [Warbixinta Waajibka ah](#)

Dib u Milicsiga iyo Qorsheynta Talaabada

Dhowr daqiiqo ku bixi inaad ku muujiso waxa aad kusoo baratay xiisada casharkaan. Isticmaal meelaha banaa hoose ee si aad u muujiso aragtidaada iyo qorshe howleedkaaga.

Xiisadaan waxaan ku bartay...

Xiisadaan ayaa i siisay inaan
bilaabo in aan ka fakaro...

Ayadoo lagu saleynaayo waxa aan bartay, qaar kamid ah waxyaabaha aan qorsheynaayo in aan sameeyo ...